LINDESBERGS KOMMUN

# *Warbixin ku saabsan waxbarashada Masugnen iyo sfi*



# Tusmada qoraalka

Ku ardayda ku cusub sfi:ga Lindesberg ........................................................ 3

Ujeedo ........................................................................ 3
Hawlaha waxbarasho ee Masugnen .............................................. 3
Koorasyadeena iyo heerarkooda ................................................ 3
Koorsooyinka waxaa loo qaybiyay afar heer. ................................... 4
Maqnaashaha .................................................................. 4
Waxbarashada dadka waaweyn ................................................... 5
Jihaynta dariiqa waxbarashada iyo shaqada .................................... 5
Nadaamka dugsiyada Iswiidhan ................................................. 5
Dugsi hoose dhexe, dugsi sare iyo kulliyad ................................... 6
Baarlamaanka iyo wasaarada waxbarashada ...................................... 6
Qof weyn iyo luqad cusub ..................................................... 6
Isticmaal Iswiidhishka ....................................................... 8
Luqada Iswiidhishka sidaa ugu baran lahayd meel ka baxsan dugsiga ............ 8
Maktabada .................................................................... 9
Sidaa qoraalka si fiican ugu baran lahayd .................................... 9
Dhis keydkaaga ereyooyinka ................................................... 10
Ugu dambeyn… ................................................................ 10

# Ku ardayda ku cusub sfi:ga Lindesberg

### Ujeedo


Qoraalkaan labo ujeedo ayaa looga dan leehay. Tan hore in macluumaad lagaa siiyo nadaamka waxbarashada, waxbarashada dadka waaeyn iyo sfi iyo in lagu siiyo macluumaad, talo iyo tusaale ku saabsan sida ugu haboon ee aad Iswiidhishka ku baran kartid. Waxay ku siineysaa fursad aad ku qaado mas'uuliyadaada barashada luqada si aad hadafkaaga u gaartid.

### Hawlaha waxbarasho ee Masugnen

Masugnen waxaa wax ku barta dadka waaweyn. Waxaa lagu bartaa koorsooyin qoraal ah iyo mihnado, iyo barashada daryeelka caafimaadka iyo farsamada. Wax barashada dadka waaweyn waa ikhtiyaari, taasoo laga filaayo qofka inuu qaado mas'uuliyadiisa uu wax ku baranaayo.

### Koorasyadeena iyo heerarkooda

Sfi:ga waxaa lagu dhigtaa afar koorso oo heerar kala duwan ah, A, B, C iyo kooraska D. Kooraska aad bilaabeysid waxay ku xirantahay aqoontaada hore iyo inaa hore wax u soo baratay. Hadafkeena waa inaa ku baastid koorsooyinka oo dhan ee lagu qaato sfi:ga ayadoo loo fiirineynin heerka aad ka soo bilawday.



### Koorsooyinka waxaa loo qaybiyay afar heer.

**Heerka 1aad:** Heerka 1aad wuxuu ka kooban yahay koorsooyinka A iyo B. qaybtaan waxaa dhiganaaya dadka aan hore wax u soo baran ama iskool wax yar soo dhigtay. Raadka 1aad waxaa qofkan la siinaayaa kaalmo saa'id ah si uu ula qabsado waxbarashada.

**Heerka 2aad:** Heerka 2aad wuxuu ka kooban yahay koorsooyinka B iyo C. qaybtaan waxaa dhiganaaya dadka soo dhigtay waxbarasho ilaa dugsi dhexe. Iswiidhisha waxaa ku dhiganeysaa xawaaraha caadiga ee waxbarashada. Waxaa lagu baraayaa sida ugu fiican ee aad ku baran kartid luqada Iswiidhishka.

**Heerka 3aad:** Heerka 3aad wuxuu ka kooban yahay koorsooyinka C iyo D. Heerka 3aad waxaa dhiganaaya dadka leh qibrad waxbarasho ee soo dhigtay kulliyad ama jaamacad. Heerka 3aad xawaaraha waxbaridiisu waa degdeg qofka dhiganaayana waxaa lagu xiraa shuruudo adag.

Markaad sfi:ga bilaabeysid ee koorso lagu fariisinaayo waxaan ka qiyaas qaadaneynaa heerkaaga waxbarashada ee hore iyo hadafkaaga mustaqbalka wuxuu yahay. Waxaan haysanaa 14 maalmood oo lagu tijaabinaayo, taas macnaheedu in aan ku geyneyno fasal/koox aan u aragno inaa isku heer tihiin oo aad ka bixi kartid.

### Maqnaashaha

Markaadan imaan karin waxaa muhiim ah inaa noo soo sheegtid. Haddaad xanuunsatid ama ilmo kaa xanuunsadaan la soo hadal macalinkaaga. Haddii aad xanuunsantahay oo aad guriga joogtid todobaad wax ka badan waxaa lagaa rabaa inaa anaga iyo gacanhayahaaga u keentid waraaq dhaqtareed haddii kale waxaa laguu qoraayaa inaa qalad ku maqneyd. Saddex todobaad oo isku xiga haddii aad Iskoolka ka maqnaadid, oo aadan nala soo hadlin sfi:ga waa lagaa tirtiraayaa. Waxaadna naga heleysaa aqbaar. Haddii aad rabtid inaa sfi:ga dib u bilawdid waxaad soo buuxineysaa foomka ku jira boggeena internetka. Haddii aad rabtid inaa waxbarashada ka nasatid waa inaad anaga nagala hadashaa.

### Waxbarashada dadka waaweyn

Dadka waaweyn waxay leeyihiin qibrado shaqo, waxbarasho iyo habka nolosha kaasoo u sahlaaya inuu aqoon sii kororsado. Anaga aragtideena waa qofka bani'aadamka haddii uu rabo horumar waa sameyn karaa.

Waxbarashada dadka waaweyn waa mas'uuliyad qaas ah waana muhim. Waa adiga qofka waxbaranaayo waana muhiim inaa mas'uul ka noqotid waxbarashadaada. Dadka wax ku baraayo waxay u joogaan oo keliya inay xoogaa kaa kaalmeeyaan sidaad hadafkaaga ku gaari lahayd.

Qofka weyn ee wabaranaayo waxaa laga rabaa inuu soo gudbin karo wixii ra'yi ah ee ku saabsan waxbarashadiisa. Waxbarashada Iswiidhishka waxaa ka mid ahin qofka la baro hawlaha dimuqraadiyada, sinnaanta iyo ka qeybqaadashada. Sidaa daraadeed waa muhiim inaa sheegro caawinaada aad u baahantahay iyo sidaa u rabto inaa luqada u baratid!

### Jihaynta dariiqa waxbarashada iyo shaqada

Dhamaan dadka dhigta waxbarashada dadka waaweyn waxaa loo sameynaa qorshe shaqsiyadeed oo la xiriirta barashada sfi:ga. Waxaa muhiim ah inaa ka fekertid hadafka aad ka leedahay waxbarashada. Ma waxaad rabtaa oo keliya inaa luqada baratid mise waxaad rabtaa sfi:ga ka dib inaa hore u sii wadatid waxbarashadaada. Waxaa jira fursad aad kub aran kartid Ingiriiska, xisaabta iyo kombiyuutarka intaad sfi:ga dhiganeysid. Hageyaasha waxay kaala hadlaayaan inay kaa caawiyaan waxa aad dooraneysid. Waxay ku siinaayaan jawaabaha su'aalaha aad ka qabtid waxbarashada iyo suuqa shaqada.

Masugnen waxaan ku joogna labo qof jiheeyeyaal waxbarasho iyo shaqo:

| | | |
|---|---|---|
| Helene Broberg | 0581-816 04 | helene.broberg@lindesberg.se |
| Nina Sundberg | 0581-816 14 | nina.sundberg@lindesberg.se |

### Nadaamka dugsiyada Iswiidhan

Markaad rabtid inaa Iswiidhan wax barasho ka bilowdid waxaa muhiim ah inaa wax ka taqaanid nadaamka dugsiyada waddanka.

### Dugsi hoose dhexe, dugsi sare iyo kulliyad

Iswiidhan waxaan leenaha 9 sano oo dugsi hoose dhexe qasab ah. Taas macnaheedu waa in ilmaha ay qasab ku tahay inay iskuul tagaan. Waa bilaash waxayna ku bilaabaayaan 7 jir xannaanada ka dib. Dugsiga hoose dhexe ka dib ilmaha badanaa waxay dhigtaan 3 sano oo dugsi sare ah.dugsiga sare qasab ma ahan laakiin waxaa dhib ah in shaqo la helo marka laga baxo dugsiga hoose dhexe. Badanaa ardayda ka baxda dugsiyada sare ee farsamada horay shaqo ka helaan. Dadka waaweyn xitaa waxay haystaan fursad ay ku bartaan dugsi sare. Dugsiga sare ka dib dadka qaar waxay galaan kulliyadaha fasamada, kulliyado waxbarasho ama jaamacad.

### Baarlamaanka iyo wasaarada waxbarashada

Baarlamaanka Iswiidhan ayaa go'aamiya yoolka sfi:ga, koorsooyinka kala duwan ee waxbarashada. Dokumentiga la raacaayo – manhajka iyo manhajka koorasyada iyo hadafyada – ayaa ah waxa hogaaminaayo waxbarashada dugsiyada caruurta, dhalinyarada iyo dadka waaweyn. Manhajka dugsiyada iyo manhajka koorasyada waxaa ku qoran sida loogu hogaansamaayo habka waxbarida.

Mid ka mid ah hadafka waxbarida dadka waaweyn waa in – La siiyo fursad ay aqontooda ku kororsadaan qibradoodana ku kordhiyaan taasoo qayb ka ah kobcinta, dimuqraadiyada, sinaanta, koboca dhaqaalaha, hawlgelinta iyo xaq wax u qaybinta. Waxay go'aaminaayaan gogoldhigga shahaadooyinka – taasoo lagu qoraayo yoolka aad ka gaartay koorsada si caddeyn laguu siiyo. Malaguu go'aaminaayo waxaad taqaano sidaa yoolka ku gaareysid. Iskoolka iyo macallinka waxy fiirinaayaan aqontaada iyo inaa yoolka gaartay ka dibna waxaa isla go'aamineysaan sidaa yoolka ku gaari lahayd. Mar walba waxaa muhiim ah in aad saameyn ku yeelato yoolkaaga iyo sidaa ku gaari lahayd.

### Qof weyn iyo luqad cusub

Masugnen iyo sfi:ga waxaa jooga shaqaale caawimaad badan, dadaalaayo macalimiin qibrad leh oo ardaydeena u sahlaayo inay sida ugu fiican wax u bartaan. Waxbarasho dabacsan oo shaqsi walba anfacaayo.

Masugnen markaa wax ka baraneysid waxbarashadaada adaa mas'uul ka ah laakiin waxaad la dhiganeysaa koox macalin uu la joogo. Todobaadkii waxaad leedahay jadwal ah ugu yaraan 15 saacadood waxaana kula joogaayo macallin. 25ka saacadood ee soo haray waxaa muhiim ah in aad luqada iskaa u baratid. Adaa go'aansanaayo meesha aad

ku baraneysid. Waxaa muhiim ah inaa isku daydo ”ku dabaalatid iswiidhishka” intii karaankaa ah. La xiriirkaaga luqada Iswiidhishka markuu sii bato waxaa kuu fududaanaayo inaa dhaqsi ku baratid luqada cusub. Taas macnahdeedu waa in tababar saa’id aad ku sameysid luqadda Iswiidhishka maalin walba. Masugnen waxaa ku yaalo qolal yar yar oo keligaa ama wadajir dad kale aad wax ku baran kartaan. Macallinkaaga wuxuu sameynaayaa dadaal walba oo uu kugu caawinaayo si aad luqada dhaqsi ugu baratid, laakiin tan ugu muhiimsan waa in adigana luqadda ku baratid habka ugu haboon.

Waxbarashadaada sfi:ga waxaad raacin kartaa tababar shaqo, shaqo ama koorasyo kale ee seeraalaha sida ingiriiska, xisaabta iyo kombiyuutarka. Laakiin waxaad xooga saareysaa in luqada iswiidhishka ku baratid sida ugu dhaqsiyaha badan. Macallimiinta waxay ku dadaalaayaan in arday walba caawinaan arday walbana sida ugu fiican wax u baraan. Ahmiyada ugu weyn waxaan siinaa ardayda wax naga barata. Laakiin qofka ardayga ahna waxaan ka rabnaa inuu qaado mas’uuliyadiisa waxbarasho.

Waxaan rabnaa in:

- Ardayda shaqsi walba goonigiis ayaa wax loo baraa waayo dadka fahamkiisa iyo waxbarashadiisa waa kala duwanyahay.
- Waxbarida waa inay noqotaa xiriir ka dhexeeya macallinka iyo ardayga wax la baraayo.
- Waa inaad ahaataa qof FIRFIRCOON, MAS’UUL AH OO MADAX BANAAN!
- Xiriirka isgaarsiinta ka dhaxeysa ardayga iyo macallinka waa muhim. Wadahadalka iyo dooda waa sida ugu fiican wax lagu barto.
- Qofka waxaa laga rabaa inuu qorsheeyo waxbarashadiisa iskiisna u shaqeeyo, ma ahan in macallinka hadalkiisa lee la dhageysto.
- Qof walba waa inuu luqada u bartaa intii awoodiisa ah. Dadka taariikhdooda iyo aqoontooda waa kala duwan tahay sidaa daraadeed fahamkooda iyo xawliga waxbarashadooda isku mid ma ahan

### Isticmaal Iswiidhishka

Si aad u barato luqada makuugu filna oo keliya inaa macallinka dhegeysato. Haddii aad rabtid inaa luqad cusub baratid waa inaa dhexgashaa luqada, ”ku dabaalatid” luqadda.macnaha inaa dhegeysatid, aqrisid, qortid kuna dadaashid inaa kku hadashid. Iskoolka wax yar lee ku baraneysaa. Xitaa iskoolka wixii ka baxsan waa inaa luqada ku dadaashaa. Ma rabtaa inaa luqadda ku fiicnaatid makugu filna oo keliya inaa ku hadashid, qortid ku aqrisatid xogaa iskoolka. Waa inaa la timaadaa firfircooni badan. Dadka kale la hadashid, filim fiirsatid iyo talefishan, aqbaarta la socotid, radiyo dhegeysatid, qoraalo aqrisatid sida joornaalada, buugaagta iyo kombiyuutarada. Sida ugu badan oo ugu suurtogalsan u isticmaashid luqada!

Badanaa dadka yimaada Iswiidhan waxay u arkaan in luqada Iswiidhishka ay adagtahay. Waa inaad xooga sartaa luqada intii awoodaada intaa iskoolka joogtid, xitaa xilliyada bareega. Ku dadaal inaa la sheekeysatid dadka aad isku luqada ahayn, markaas si fiican aad u baraneysaa. Sida kale ee aad luqada si fiican ugu baran kartid waa inaa la aqrisatid qof kale ama koox kale (Masugnen ama qof kale gurigiis) markaad cashar lahayn.

Mararka qaar qalad waa imaanaa, dhib malahan. Qaladka ayaa waxaa ku baraneysaa sida saxa ah! Waxaad fahmi weysid ha ilaawin ina ana weydiisid!

### Luqada Iswiidhishka sidaa ugu baran lahayd meel ka baxsan dugsiga

Dhexgal dadka Iswiidhishka ah, dhegeyso oo ku hadal. Waa inaa heshaa meel iyo xaalad aad ku tababaran kartid luqadaada, xitaa xilliyada aad faraaqada tahay. Isku day inaa dadka la xiriirtid, raadso dadka aad isleedahay luqada waa ku baran kartaa.

Talo ku saabsan sidaa luqada si fiican ugu baran lahayd:

- ✓ Wax la baro ardayda aad isku fasalka tihiin
- ✓ La hadal deriskaaga
- ✓ Sameyso saaxiibo aadan isku luqad ahayn (muhiim ma ahan inuu ahaado qof Iswiidhish ah)
- ✓ La hadal shaqaalaha xanaanada markaa ilmaha geyneysid ama soo wadeysid
- ✓ La hadal ilmahaaga saaxiibadooda iyo waalidiintooda
- ✓ Isku taxalujisid ilmaha xilliyada ay faraaqada yihiin

- ✓ Isku taxalujisid inaa xubin firfircoon ka noqotid jaaliyad
- ✓ Aqri buugaag, daawo barnaamijyada Iswiidhishka
- ✓ Jimicsi aad
- ✓ Ka qayb qaado dhaqdhaqaaqyada kooxaha (qoobka cayaar,jimicsi iwm)
- ✓ Daawo telefishinka Iswiidhishka, aqri qoraalada la soo qoro
- ✓ Dhegeyso barnaamijyada ka baxa raadiyaha Iswiidhishka
- ✓ Aqri qoraalo kala duwan: buugaag, joornaalo, wargeysyada todobaadlaha, waraaqo daabacan, qoraalada internetka iwm
- ✓ Qor waraaqo, meyl, sms, sheeko, xusuus qor, liiska iibsiga, waraaqaha xusuusta lagu qorto oo Iswiidhish ah

### Maktabada

Aad maktabada! Maktabadaha Iswiidhan cajaa'ib ay leeyihiin. Waxaad si lacag la'aan ah ku soo amaahan kartaa buugaagta dadka waaweyn, dhalinyarada iyo caruurta. Maktabadaha waxaad ka heleysaa joornaalo, wargeysyada todobaadlaha, filimaan iyo buugaag maqal ah. Buugaag ku qoran luqad fudud ayaa waxay yaaliin qaanad gooni ah. Haddii aad daneynysid buugaagta qisooyinka iyo sheekooyinka waxaad la xiriireysaa qaybta dhalinyarada iyo caruurta. Meeshaas waxaad ka heleysaa buugaag ku qoran luqad aan adkeyn oo fudud.
Weydii shaqaalaha maktabada ayagaa ku caawinaayo. Meeshaba waxay u joogaan adiga daraadaa!

### Sidaa qoraalka si fiican ugu baran lahayd

Si aad u barato qoraalka saxa ah waa inaad wax badan aqrisaa. Markaad wax aqrineysidna ku dadaal inaa fahamtid: tusaale ahaan ka feker kalmadaha la isticmaalay, nooca naxwaha, calaamadaha sida (dhibic, hakad iwm).

Dhegeyso waxa macallinka dhahaayo marka qoraalka laguu saxaayo. Macallinka wuxuu leeyahay aqoon iyo qibrad waana ogyahay baahidaada si qoraaladaada sax u noqdaan. Isku day inaa wax ka barato waxa laguu sheegaayo, qoraalkaaga sii wanaaji si marka dambe aad farta u hagaajisid.

Xusuusnow marwalba mas'uuliyada waxbarashadaada inaa adiga haysid! Macallinka dariiqa uu ku tusaa oo keliya, laakiin hawsha inteeda badan adigaa qabanaayo. Waa inaa

ahaataa qof firfircoon! Luqada Iswiidhishka waxaad ka dhigataa qay noloshaada ka mid ah!

### Dhis keydkaaga ereyooyinka

Ka biloow inaa barato eryada iyo dhawaaqooda waxaadna ku baratаa habka laxameysan ee Luqada Iswidhishka loogu dhawaaqo. Baro ereyooyinka israacsan ee Iswiidhishka sida ”Tack så mycket” ama ”Vad heter du”. (mahadsanid ama magacaa)
Ereyada kugu cusub qor ka dibna luqadaada ku tarjumo. Yool u degso inta erey ee aad rabtid inaa maalin walba baratid.

### Ugu dambeyn...

… waa adi qofka wax baranaayo. Dadka kale warbixin ley ku siinaayaan, sida dhabta ah waa adiga qofka wax baranaayo – qof kale ma ahan. Waa inaa la timaadaa rabitaan waxbarasho waana inaa luqada barashadeeda xooga saartaa. Macallimiinta hawsha ley kaa caawinaayaan.

*Nasiib wanaagsan!*

Shaqaalaha Masugnen ee Lindesberg

## Qoraaladeyda